

**WARGELIN:**

Inta lagu jiro mudada waxbarashada online-ka ah, xarumaha caafimaadka ee dugsigu waxay u furnaan doonaa ardayda si ay u qabsadaan balamo foolka-foolka ah iyo kuwo taleefanka ah.



## SANAD DUGSIYEDKA 2020-2021

Waalidiinta Qaaliga ah/Masuuliinta Caruurta:

Caafimaadka ardaygaagu waxa weeye qayb muhiim ah oo kamid ah guusha waxbarashadooda. Si loogu taageero guusha, Highland Park Elementary waxa uu leeyahay xarun caafimaadka oo dugsiga ku taala (school-based health center, SBHC) oo ay heli karaan dhamaan ardayda imanaysa iyo kuwa taleefanka lagu dawaynayaaba. SBHC waxa ka shaqeya Neighborcare Health, xarunta caafimaadka bulshada oo u adeegta in ka badan 71,000 oo qof oo deggan Seattle iyo Vashon Island sannad kasta.

SBHC waxay bixisaa goobta saaxiibtinimada cunuga iyo dhammaan adeegyada dhakhtarka qoys ayagoon kabixin dugsiga. SBHC waxay bixisaa ballanada kahor dugsiga, muddada dugsiga lagu jiro iyo dugsiga kadib. Xataa hadii ardaygaagu uu hore u leeyahay daryeelo, waxa aanu si dhaw ula shaqayn karnaa isaga, waxa aanu bixin karnaa qaab haboon oo caafimaadka ah, daryeelka ilkaha, iyo adeegyada caafimaadka maskaxda ee dugsiga.

**Si loo isticmaalo adeegyada SBHC, fadlan dhammaystir oo saxeex foomamkan soo socda ee ku jira baakadan:**

- Foomka Taariikhda Caafimaadka (boga 2)
- Foomka Duwaan Gelinta (boga 3-4)
- Foomka Ogolaanshaha (boga 5)
- Ogolaanshaha Shaybaadhka Ilkaha (boga 6)
- Foomka Bixinta Duwaanka Waxabarashada (boga 7) (lkhtiyaar)

Foomamka waxa lagu soo celin kartaa baakada dugsiga ama loogu soo diri karaa boostada dugsiga si gooni ah. Waxay sidoo kale keeni karaan shaqsi ahaan SBHC ama xafiiska weyn ee dugsiga.

**Bixinta Duwaanka Waxbarashada:** Foomkani waxa uu u sahlayaa duwaanada dugsiga ilmahaaga in lala wadaago Neighborcare Health. Ogolaanshahaaga diiwaanada dugsigu waxa ay u ogolaansaa Neighborcare Health inay la shaqayso macalimiinta iyo shaqaalaha si loo horumariyo waxbarashada ardayga, joogitaanka, heerarka iyo dabeecada.

**Kharashka Adeegyada:** Neighborcare Health way ka go'an tahay in ay u adeegaan ardayda iyagoon u eegaynin tamartooda bixinta lacagta. Highland Park Elementary SBHC waxay ka heshaa taageero Canshuurta Waxbarashada iyo Qoysaska, laakiin lacag siintani si buuxda uma daboosho kharashaadka howlgalka barnaamijka; sidaa darteed SBHC waxay soo diri doontaa biilka caymiska marka ay suuraggal tahay. Fadlan dhammaystir qaybta caymiska ee foomka diiwaangalinta si aan u hubinno inaan hayno macluumaadkaaga caysmika ee ugu danbeeyay.

Haddii aanad lahayn caymis caafimaad, SBHC waxay kaa caawin kartaa inaad isdiiwaangaliso qorshaha caymiska. Fadlan saxi "No Insurance" (Maya caymiska) sanduuqa ku yaal foomka isdiiwaangalinta oo xubnaha shaqaalaha SBHC way ku daba gali doonaan. Waxaad sidoo kale si toos ah u wici kartaa SBHC si aad u codsato caawimaad.

Highland Park Elementary waxuu nasiib u helay SBHC oo waxaan rajaynayaa in aad ka heli doonto faa'iidada khayraadkan cunugaada. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama aad u baahan tahay kaalmo, fadlan kala hadal Highland Park Elementary SBHC-giisa 206-455-9025.

Si daacadnimo leh,

Adam Dysart  
Maamule

# XARUNTA CAAFIMAADKA EE DUGSIGA KU-TAALA FOOMKA TAARIIKHDA CAAFIMAADKA ILMAHA



Fadlan buuxi foomkaan si uu nooga caawiyo inaan cunugaaga siino daryeel tayo leh. Cunugaaga waxaa loogu yeeri doonaa xarunta caafimaadka si uu umaro baaritaan caafimaad oo loo baaro miisaankiisa, dheerarkiisa, cadaadiska dhiiga iyo taariikhdiisa dhanka talaalka, loona marsiyo qiimaynta halista dhanka caafimaadka. Xarunta caafimaadka ayaa kulasoo xariiraysa si ay wax kaaga waydiiso talooyin aad kubiirinayso caafimaadka cunugaaga iyo udiyaar garoowgiisa waxbarashada. Ogolaansho dheeri ah oo uu bixiyo waalidka/masuulka ayaa loo baahan yahay kahor intaan ilmaha lasiin wax talaalo ah. Fadlan laxariir xarunta caafimaadka hadii cunugaagu qabo xaalado caafimaad uuna ubaahan yahay in balan loo qabto.

<b>ARDAYGA</b>	Magaca Hore	Magaca Danbe	Taariikhda Dhalashada / /
	Magaca Daaban ee Qofka Foomka Buuxinaaya	Xidhiidhka Ardayga iyo Qofka (haddii aanu isaga ahayn)	Taariikhda foomka la buuxiyey / /
	Nambarka aleefanka Ugu Haboon ee Lagaasoo wacaayo	Xiliga ugu fiican ee Lagusoo Wacaayo	

## SU'AALAHA KU SAABSAN CUNUGAAGA:

Haa  Maya Cunugaadu Ma leeyahay dakhtar dayeel aaasi ama xarun caafimaad?  
 Magaca bixiyaha: \_\_\_\_\_ Xarun caafimaad: \_\_\_\_\_ Telefoonka: \_\_\_\_\_

Haa  Maya Cunnugaaga miyaa lagu sameeyey baadhitaanka caafimaadka jidhka ama baadhitaan dhammaystiran ma lagu sameeyey sannadkii hore?

Haa  Maya Cunugaagu ma utagay dhakhtarka ilkaha sanadkii lasoo dhaafay?

Haa  Maya Cunugaagu maqaataa wax daawo ama xasaasiyaad kale ah?  
 (Faahfaahin ka bixi): \_\_\_\_\_

Haa  Maya Cunnugaagu miyuu qaataa wax daawooyin ah? (Oo ay kamid yihiin fitamiinada iyo daawooyinka aanu dhakhtar u qorin)  
 Daawooyinka \_\_\_\_\_ Qiyaasta daawooyinka \_\_\_\_\_ Sababta \_\_\_\_\_

Haa  Maya Cunugaagu maqabaa dhibaatooyin joogto ah oo caafimaad ama dhibaatooyin caafimaad oo hadda jira?  
 (Faahfaahin ka bixi): \_\_\_\_\_

Haa  Maya Cunugaaga waligiis maladhigay isbitaal ama qaliin magalay?  
 (Faahfaahin ka bixi): \_\_\_\_\_

Haa  Maya Cunugaagu maqabaa baahiyo dhanka dugsiga/waxbarashada ah ama walaacyo?  
 Dhibaatooyin dhanka xaadirista ah  Buundooyinkiisa oo kasii dara ama sii dhacaaya  Waxbarashada Gaarka ah  
 Midkale: \_\_\_\_\_

Haa  Maya Walaacyo kale makaqabtaa faya qabka cunugaaga (tusaale, walwal badan, istarees, niyad jab, walaac, iwm.)  
 (Faahfaahin ka bixi): \_\_\_\_\_

## SU'AALAHA KU SAABSAN QOYSKAAGA:

Ayaa ku nool gurigiina?  
 Haddii cunugaagu sidoo kale kunool yahay guri kale, yaa halkaas kunool?

Haa  Maya Miyey jireen wax isbadalo waaweeyna ama carqalado oo qabsaday qoyskaaga sannadkii hore?  
 Haddii ay haa jawaabtu tahay, faahfaahi: \_\_\_\_\_

Haa  Maya Majiraa qof cunugaaga lanool oo sigaar caba, shiishad, sigaarka elektarooniga ah, ama marijuana?

Haa  Maya Walaac makaqabtaa inaysan jiri doonin cunto ama lacag idin kufilan si aad qoyskaaga uquudiso?

Haa  Maya Qori miyuu yaalaa gurigaaga? Haday tahay haa, ma xaalad adag baa?  Haa  Maya

Haa  Maya Cunugaagu ma mid aad korsataybaa?

## TAARIIKHDA CAAFIMAADKA QOYSKA (tigsaar dhamaan meelaha quseeya)

Xubin Qoyska kamid ah	Majiraan Dhibaatooyin La ogyahay	Khamriga/Maandooriyaasha	Lafo xanuunka	Xiig	Kanser	Dhibaatooyinka Wadnaha	Niyadjab	Macaan	Subug saa'id ah	Mastax fалуuq	Xanuunka Kalyaha	Xanuunka Dhimirka	Dhibaatooyinka Araga
Hooyo													
Aabo													
Xubin kale Qoyska kamid ah:													
Xubin kale Qoyska kamid ah:													

Majiraan xanuun ama cudur horay qoysku uqabi jiray?

# XARUN CAAFIMAAD OO DUGSIGA KUDHEX TAALA FOOMKA DUWAAN GELINTA BUKAANKA



Fadlan si dhamaystiran ubuuxi foomkaan si uu nooga caawiyo inaan cunugaaga siino daryeel tayo leh. Ogolaanshahani waxa uu ahaan doona mid firfircoon sannad ilaa sannad. Fadlan soo gudbi codsigaaga oo qoraal ah si aad uga laabato ogolaanshaha aad siisay adeegyada.

## Fadlan buuxi qaybaha 1-6.

I. MACLUUMAADA ARDAYGA IYO DEEGAANKA					
MAGACA DANBE	MAGACA HORE	MAGACA DHEXE	KII UGU DANBEEYAY EE HORE	KAN KOOBAAD EE LADOORTAY	
NAMBARKA ID GA ARDAYGA		TAARIKHDA DHALASHADA / / BISHA TAARIKHDA SANADKA	JINSIGA DHALASHADA <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig	JINSIGA SHARCIGA AH <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig <input type="checkbox"/> Khaniis	
CINWAANKA BOOSTADA		GURIGA	CINWAANKA LABAAD (hadii uu ka duwan yahay)		GURIGA
MAGAALADA:	GOBOLKA	ZIP:	MAGAALADA:	GOBOLKA	ZIP:
TALEEFANKA BUKAANKA _ _ _ - _ _ _ - _ _ _		<input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Mobile <input type="checkbox"/> Shaqada		Taleefanka ARDAYGA _ _ _ - _ _ _ - _ _ _	
CIWAANKA IIMEELKA WAALIDKA			CIWAANKA IIMEELKA ARDAYGA		
QAABKA AAD DOONAYSO IN BALANTA LAGUU WARGELIYO (dooro hal) WAALIDKA <input type="checkbox"/> Fariin Qoraal ah <input type="checkbox"/> Taleefan <input type="checkbox"/> MyChart			QAABKA AAD DOONAYSO IN BALANTA LAGUU WARGELIYO (dooro hal) ARDAYGA <input type="checkbox"/> Fariin Qoraal ah <input type="checkbox"/> Taleefan <input type="checkbox"/> MyChart		
AQOONSIGA JINSIGA	<input type="checkbox"/> Dhedig <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Su'aal		<input type="checkbox"/> Nin Naag Isku Badalay <input type="checkbox"/> Naag Nin Isku Badashay <input type="checkbox"/> Khaniis		<input type="checkbox"/> Waxkale _____ <input type="checkbox"/> Aan doonaynin inuu sheego
DOOKHA JINSIGA	<input type="checkbox"/> Caadi <input type="checkbox"/> Khaniis		<input type="checkbox"/> Khaniisad <input type="checkbox"/> Khaniis	<input type="checkbox"/> Laba Jinsiga Eega <input type="checkbox"/> Laba Jinsiga Daneeya	<input type="checkbox"/> Waxkale: _____ <input type="checkbox"/> Aan doonin inuu sheego
MAGACA QOFKU JECELYAHAY	<input type="checkbox"/> Iyada, Waxeeda, Teeda <input type="checkbox"/> Isaga, Kiisa, Wixiisa		<input type="checkbox"/> Iyada, Tooda, Waxooga <input type="checkbox"/> Waxkale:		<input type="checkbox"/> Aan doonin inuu sheego
MA WAXA AAD TAHAY HISBAANIG MISE HISBAANIG-LATIN?	<input type="checkbox"/> Haa, Hispanic ama Latino		<input type="checkbox"/> Aan ahayn Hispanic ama Latino		<input type="checkbox"/> Aan doonin inuu sheego
WAA MAXAY ISIRKA AMA ASALKA QOYSKAAGU?	<input type="checkbox"/> Hindida Maraykanka/Dhalad Alaska <input type="checkbox"/> Dhalad Hawaiian		<input type="checkbox"/> Aasiyaan <input type="checkbox"/> Jasiiradaha Kale ee Baasifiga	<input type="checkbox"/> Madaw/Maraykan Madaw <input type="checkbox"/> Cadaan <input type="checkbox"/> Iska dhal <input type="checkbox"/> Diiday inuu sheego	
MA WAXA AAD TAHAY ASKARI MARAYKAN AH OO HAWL GABAY?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya				
WAA MAXAY XAALADAADA SHAQO?	<input type="checkbox"/> Labada Gelin <input type="checkbox"/> Gelin <input type="checkbox"/> Xili		<input type="checkbox"/> Ilme <input type="checkbox"/> Aan Shaqaynin <input type="checkbox"/> Ciiadamada Ku Jira		<input type="checkbox"/> Is U Shaqaysta <input type="checkbox"/> Hawl Gabay <input type="checkbox"/> Arday
WAA MAXAY LUUQADA AAD DOORBIDO INAAD WAX KU QORTO?				MIYAAD U BAAHAN TAHAY TURJUBAAN?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
2. WAALIDKA/MASUULKA (HADII BUKAANKU KAYARYAHAY 18)					
MAGACA UGU DANBEEYA EE WAALIDKA/MASUULKA	MAGACA UGU HOREEYA EE WAALIDKA/MASUULKA		TAARIKHDA DHALASHADA / /	JINSIGA <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig	
CINWAANKA BOOSTADA	GURIGA		XAIXIDHIIDHKA KALA DHEXEYEA BUKAANKA <input type="checkbox"/> Waalid <input type="checkbox"/> Koriye <input type="checkbox"/> Waxkale		
MAGAALADA	GOBOLKA	BOOSTA	TALEEFAN <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Mobile <input type="checkbox"/> Shaqada _ _ _ - _ _ _ - _ _ _		

# XARUNTA CAAFIMAADKA DUGSIGA KU SALAYSAN FOOMKA DUWAAN GELINTA BUKAANKA



**Badalida foomka ee sii socota.**

### 3. CAYMISKA

MA LEEDAHAY CAYMIS?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
FADLAN WAXA AAD QORTAA MACLUUMAADKA CAYMISKA	MAGACA SHIRKADA CAYMISKA	TAARIIKHDA HIRGELINTA	
	LAMBARKA QORSHAHA KOOXDA	LAMBARKA AQOONSIGA XUBINTA	
	MAGACA CIDA QORAN/CIDA LEH CAYMISKA	TAARIIKHDA DHALASHADA CIDA QORAN	
MIYAAD DOONAYSAA BARNAAMIJYADEENA GAARKA AH EE QIIMO DHIMISTA AH?	Waxa aanu bixinaa qiimo dhimis gaar ah hadii aanad lahayn caymis caafimaadka ah oo aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta kharashka caymiska caafimaadka ee aanu caymisku bixinaynin. Cida u qalanta baraamijka iyo kharashka ugu yar waxa uu ku salaysan yahay cabirka iyo dakhliga qoyska. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo sida loo dalbanayo, ma doonaysaa inaad la kulanto mid kamid ah khabiirada u qalanka?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

### 4. SU'AALO DHEERAAD AH (U hadlaya bukaanka ama, hadii bukaanku yar tahay, fadlan u hadal koriyaha sharciga ah.)

DAKHLIGA SANADLAHA AMA BILAHA AH	Waa maxay isugayn dakhligaaga sanadkii (sanadle)?	\$	Hadii ay fududahay in la xisaabiyo, waxaa maxay dakhliga bishii ee qoyskaagu?	\$
TIRADA GUUD EE GURIGA KUNOOL	Tirada xubnaha qoyska ee lagu sheegay canshuurta dakhliga ee federaalka?			
MA TAHAY QOF BILAA HOY AH AMA HOY KUMEEL GAAR AH KUNOOL?	<input type="checkbox"/> Aan Bilaa Guri Ahayn <input type="checkbox"/> Laba Jibaar <input type="checkbox"/> Waxkale <input type="checkbox"/> Guryo Taageero Rasmi ah <input type="checkbox"/> Guryaynta Shacabka <input type="checkbox"/> Hoy <input type="checkbox"/> Jid <input type="checkbox"/> Kala Guur			
XAALAD SHAQAALE SOO GALAYTI/XILIYEED	Wakhti kamid ah labadii sano ee lasoo dhaafay, ma ahayd shaqaale beerta xiliyada gaarka ah ama soogalootigu isha ugu wayn ee dhaqaalahaaga ama kan qoyskaaga?		<input type="checkbox"/> Aan Ahayn Shaqaale Beero <input type="checkbox"/> Haa, Soo Galayti Shaqaale Beero <input type="checkbox"/> Haa, Shaqaale Beereed Xiliyeed	
SIDEE AYAAD U HESHEY MACLUUMAADKA NEIGHBORCARE HEALTH? (Sax dhamaan inta ku munaasabka ah)	<input type="checkbox"/> Asxaab iyo qoyska <input type="checkbox"/> Caymis <input type="checkbox"/> Baadhitaan Online (Google) <input type="checkbox"/> Bixiye kale oo aan ahayn Neighborcare <input type="checkbox"/> Meel haboon/u dhaw guriga <input type="checkbox"/> Kooxo kale oo bulshada ama barnaamijyo <input type="checkbox"/> Baraha bulshada (Facebook, Twitter, Instagram) <input type="checkbox"/> Xayaysiis (bilboodh, bas, wargeys) <input type="checkbox"/> Dugsiga <input type="checkbox"/> Waxkale			

### 5. WARGELINTA SIRTA

Waxaan halkaan kaxaqiijinayaa inaan helay Ogaysiiska Xeerarka Macluumaadka Sirta ah ee Neighborcare Health. Waxaan fahmayaa in Neighborcare Health ay ilasoo xariiri karto si ay ii xasuusiso balantayda, natiijooyinka imtaxaanka, dookhyada daawada ama faaiidooyinka kale ee laxariira caafimaadka iyo adeegyada ayadoo igasoo wacaysa taleefanka, fariin qoraal iisoo diraysa, iimeel iisoo diraysa, ama fariin cod ah iireebaysa.	Dhexe
--	-------

### 6. SAXEEXA BIXINTA IYO OGOLAANSHAHA

**XAQIJIJINTA MACLUUMAADKA IYO OGOLAANSHAHA DARYEELKA:** Anigu waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka sajiiladda ee aan ku warheliyey Neighborcare Health uu hadda sax yahay, oo waxaan fahamsanahay in wix isweydaaris macluumaad ee aan ulakas u gudbiyaa ay igu keeni karto inaan mas'uul ka no-do khartashka adeegyada la i siiyey oo buuxa. Anigu waxaan fasax u siiyey shaqaalaha Caafimaadka caafimaadka dhimirka, iyo daryeelka lkaha inay sameeyaan daaweynta iyo dabiibka ay u arkaan xirfad ahaan iyo caafimaad ahaan inuu daruuri yahay ama talo ku Avon ciladda iyo daaweynta dhibaataada caafimaad. Anigu waxaan fahamsanahay in daryeelka caafimaad ay bixin doonaan Dhakhtar, Xirfadyahan Kalkaaliso ah, Kaaliye Dhakhtar ama shaqaale kale oo ruqsad u haysta. Waxa aan fahamsanahay in daryeelka caafimaadka maskaxda inuu bixin karo Shaqaalaha Bulshada Liisanka Haysta, Lataliyaha Caafimaadka Liisanka Haysta, ama shaqaale kale oo liisan haysta. Anigu waxaan fahamsanahay in daryeelka ilkaha ay bixin donan Dhakhtarka ilkaha, Xirfadyahanada ilkaha, ardayda ilkaha ama saxada ama tabarucayaal tababaran sida waafaqsan Xeerka Ku-dhaqanka Shaqada Ilaaha ee Gobolka Washington. Oggolaanshahan wuux jiri doonaa ilaa oggolaanshaha lagu buriyo ogeysiis qoraal ah oo ku socda Madaxa Caafimaadka/Ilkaha. Hawshan iyo fasaxiddan waxay ku amaraysaa Neighborcare Health in ay u sii dayn karto sharikadda caymiska, Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid (Centers for Medicare and Medicaid Services, CMS) ama Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) wixii macluumaad ay u baahdaan si loo qeexo dheefta la xidhiidha adeegyada. Waxaan halkaan ku amrayaa caymiye kasta oo aan qorshe la leeyahay inuu si toosa u siiyo wixii dheef ee qorshayaasha caymiska adeegyada la i-siiyey. Waxaan ogolahay in la bixiyo si buuxda dhammaan kharashyada aanu si buuxda u bixin caymiyaha la igmaday.

SAXIIXA	XAIXIDHIIDHKA KALA DHEXEYTA BUKAANKA	TAARIIKHDA / /
---------	---	-------------------

XARUNTA CAAFIMAADKA EE DUGSIGA KU-TAALA

OGGOLAANSHO ADEEGYADA CAAFIMAADKA



Xarumaha Caafimaadka Neighborcare Health ee Ku-yaala Dugsiga waxay ku yaalaan Dugsiyada Seattle Public Schools iyo Vashon Island School District. Neighborcare Health waa inay haystaan oggolaansho oo ay saxiixeen waalid ama wakiil sharciya kahor intaan la siin adeegyada, marka laga reebo xaaladaha ay sharciyada federaalka iyo/ama gobolku ay u ogol yihiin ardayga in u helo daaweynta caynkaas ah iyadoo aan oggolaansho laga hayn waalidka/masuulka. Ardayda qasab kuma ahan inay kadiiwaan gashanaadaan xarun caafimaad si ay u helaan adeegyada ay bixiso kalkaalasada dugsiga.

<b>Waxaan halkan ku codsanayaa oo ku ku amrayaa:</b> (Magaca daabacan ee ardayga hoose.)			
Magaca Hore	Xarafka Dhexe	Magaca Danbe	Taariikhda Dhalashada / /

inuu helo adeegyada daryeelka caafimaadka jira iyo kuwa daruuri ay u arkaan shaqaalaha Neighborcare Health ee Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga Kutaala (SBHC, school-based health center). Adeegan waxaa kamid ah, laakiin kuma xadidna: latalinta caafimaadka maskaxda, shaybaadhka caafimaadka joogtada ah, naturopathy, isboortiga la sameeyo, badqabka ilmaha ama daryeelka ilmaha dhawr iyo toban jirka ah iyo daawaynta xanuunada daran iyo dhaawacyada, talaalka, daraasada dhiiga, sawirada, raajiga, adeegyada daawaynta ilmaha iyo nadiifintooda. Shaqaalaha SBHC waxay dhiirgeliyaan ka qaybqaadashada qoyska ee daryeelka ay siiyaan ardayda. Hase ahaatee, haddii aanan joogin, anigu waxaan oggolaansho ku bixinaya in ardayga uu helo adeegyada. Daryeelkani waxa noqon karaa mid foolka fool ah ama mid taleefanka ah ama booqasho daawayn maqal iyo muuqaal ah. Oggolaansho waxa waliba la siinayaa in loo gudbiyo daryeel iyo haddii loo baahdo, qaadis xaalad degdegga dhakhaatiirta kale, xirfadlayaal daryeel caafimaad, isbitaal, meelaha baarista, ama hay'adaha daryeelka caafimaad haddi ay sidaa gartaan oo ay la noqoto lagamamaarmaan Xarunta Caafimaadka Neighborcare Health iyo SBHC shaqaalaheeda. Oggolaanshahaan ma oggolaansho in adeegyo la bixiyo oggolaansho la'aanta ardayga, iilaa inaan ardaygu karayn in u golaansho baxsho mooyaane. Neighborcare Health waxa ka go'an abuuritaanka guri bixiya daryeel caafimaad oo ay kujiraan caafimaadka, daryeelka ilkaha iyo daryeelka caafimaadka dhimirka Neighborcare Health na waxay dhiiri galisaa xariirka mudada fog ee udhaxeeya bukaanada iyo adeeg bixiyaasha. Neighborcare Health waxa ay la shuraakowday bixiyayaal kale oo ku jira bulshada kuwaas sidoo kale u arka kara bukaanada aan u adeegno si ay u hubiyaan daryeelka in la isku duway.

Sida waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama federaalka, marka oggolaansho loo bixiyo daryeel, macluumaadka daryeelka caafimaad waa qarsoodi. Waxyaabaha qaar ayaa reeban; tusaale ahaan:

1. Oggolaansho waxaa lagu bixiyay macluumaad saxeexan oo u bixiyay bukaanaka ama waalidka/wakiilka.
2. Haddii bukaanu muujinayo khataraha waxyeello ku keenaya qofka ama kuwa kale.
3. Bukaanu waxaa uu qabaa dhibaato caafimaad oo nololaha halis ku ah oo uu ka yar yahay 18 sanno jir.
4. Ay jirto sabab looga shakiyo tacadi ama daayacaad.
5. Caddeyn cudurada lakala qaado ama la isku gudbiyo, oo u baahan in loo sheego ama loo gudbiyo maamulka caafimaadka guud ee dadweynaha.

Oggolaanshaha waxa loo bixinaya in lala wadaago macluumaadka daruuriga ah dhammaan bixiyayaasha daryeel caafimaad ee SBHC Xarunta Caafimaadka, oo ay ku jirto macluumaad isweydaarsiga ka dhexeeya la taliyaha caafimaadka maskaxda, kaaliyaha caafimaad ee howlgalka iyo kaaliyaha caafimaad ee dugsiga si loo siiyo daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ardayga kor ku magacaaban. Si loo sahlo iskudubaridka daryeelka, xogta ardayga ee SBHC Ku-taal waxa heli kara shaqaalaha SBHC ee Neighborcare Health. Oggolaanshaha la siiyo kaaliya dugsiga ee bixinaysa dawooyinka aan la qorin (tusaale ahaan, Ibuprofen, Tylenol, Tums, iwm.) sida uu u qoray bixiyah caafimaadka SBHC.

Ardaydu waxa kale oo ay ka heli karaan adeegyo caafimaad si madaxbanaani ah kiliinigyada Neighborcare Health ee kasta. Marka oggolaanshahaan lahel, adeegyada waxaa laga heli karaa mid ka mida xarumaha caafimaadka Neighborcare Health ee soo socda. Si aad u aragto liiska xarumaha caafimaadka, fadlan booqo webseetkena oo ah neighborcare.org. Si aad balan uqabsato, wac xarunta Xariirka Bukaanaka ee Neighborcare adoo wacaaya 206-548-5710.

Oggolaanshaha waxa la si yay adeegyada la siiyo Neighborcare Health inta lagu da jiro wakhtiga ardaygu is qoray Dugsi ah Neighborcare Health SBHC ama wakhtiga adeegyada la siiyay farmasii kale oo ah rugaha caafimaadka Neighborcare Health. Lasoo ka-bixitaanka oggolaanshahaan waxa la qaban karaa wakhti kasta iyada oo loo qorayo SBHC.

Saxeexa ardayga: (Loogu baahan yahay 13 iyo wixii ka wayn)	Taariikhda: / /
Saxeexa Waalid/Masuulka:	Taariikhda: / /
Magaca Wakiilka Masuulka ee Sharciga (Daabac):	Xidhiidhka:

**MACLUUMAAD MUHIIMA OO DHEERAADA OO LAXARIIRA OGGOLAANSHAHA CARUURTA**

Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, SBHC waxay siin oo ka gargaari ardayda helitaanka daryeel dibedda ah haddii loo baahdo. Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, dhalinyartu si madaxbanaan ayey u heli karaan daryeelka caafimaadka dhalimada da' kasta iyada oo aan oggolaansho la'aan waalid/wakiil. Dhallinyarada (da'da 13 iyo ka weyn) waxay si madaxbanaan u heli karaan adeegyada alkoolada iyo daroogada iyo latalinta caafimaadka maskaxda iyadoon la helin oggolaanshaha waalidka/wakiilka. SBHC waxay ku dhiirgelisaa arday kasta inuu waalidka ama wakiilka la socodsiiyo go'aannada daryeelka caafimaad markii ay suuragal tahay. Markii ay munaasib tahay, SBHC waxay ka gargaari ardayga kala hadlaka xaaladahaas waalidka/wakiilka.

Iyada oo dhalinyartu ay bixin karaan oggolaanshaha daaweynta, oggolaanshahoodu sharci ahaan waxa looga baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha uurka iyo cudurada galmada ku faafa (oo ay ku jirto HIV/AIDS testing). Oggolaanshaha ardayda 13 jirka iyo ka weyn, iyo oggolaanshaha ka imid waalidka/wakiilka ardayga da'diisu tahay 12 ama ka hooseeya waxa uu si sharci ah ugu baahan yahay fasixada macluumaad ku saabsan alkaahoolka iyo daroogooyinka ama latalinta caafimaadka maskaxda. Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira oggolaanshaha caruurta booqo: [www.washingtonlawhelp.org](http://www.washingtonlawhelp.org) kadibna baar "Minor Consent (Oggolaansaha Caruurta)."

XARUNTA CAAFIMAADKA EE DUGSIGA KU-TAALA

OGOLAANSHAHA SHAYBAADHKA ILMAHA



ISKUULKA:		FASALKA #:	Lambarka Duwaanka Caafimaadka (Medical Record Number, MRN): (Isticmaalka Maamulka)	
<b>WAALIDKA AMA MASULKA QAALIGA AHOOW:</b> Waxaan baaritaan dhanka ilkaha ah kabixinaynaa dugsiga cunugaaga si aan kuugu wargalino caafimaadka ilkaha cunugaaga. Shaybaadhka waxa uu leeyahay kharash la iska bixinayo. Hadaad noo ogolaato inaan cunugaaga baaritaan kusamayno: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Shaybaadhka ilkaha waxaa dib loo bilaabi doonaa marka ardaydu ay kasoo noqoto waxbarashada fasalka dhaxdiisa.</li> <li>• Waxaan kufaraxsanaan doonaa inaan kusiino macluumaad si aad uqabsato balanta caafimaadka ilkaha, ama aan balan kuugu qabano adigga.</li> <li>• Waxaan kuusoo diri doonaa koobiga natiijooyinka cunugaaga. Macluumaadkaan waxaa lala wadaagi karaa dugsiga cunugaaga.</li> <li>• Waxaa laga yaabaa inaan fariin kuugu reebno taleefanka hadii aan ubaahano inaan kaalaso xariirno baahiyaha caafimaadka ilkaha ee cunugaaga.</li> </ul>			<b>WAA MAXAY BAARISTA ILKAHA?</b>  Bixiyaha daryeelka ilkaha Neighborcare Health waxa uu eegi doonaa ilkaha ilmahaaga oo waxa uu samayn doonaa qiimayn muuqaala ah.  Waxay marin doonaan flooraydh oo ah dabool ilaalin lagu rinjiyeeyo ilkaha si ay uga caawiso kahortagga daloolada cusub uguna gargaarto joojinta daloolada hore u bilaabmay.  Eegista ilkaha MA beddelayso baaritaanka ilkaha dhammaystiran ee dhakhtarka ilkaha ee ilmahaaga.	
Waalidiinta ama Masuuliyiinta, fadlan soo buuxi warbixinta hoose ee foomka oo soo saxiix foomkaan xagiisa hoose.				
<b>MAGACA ARDAYGA:</b>				
MAGACA HORE		Dhexe	MAGACA DANBE	TAARIKHDA DHALASHADA / /
JINSIGA ARDAYGA: <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig <input type="checkbox"/> X				
<b>MAGACA WAALIDKA/MASUULKA:</b>				
HORE		DHEXE	DANBE	TAARIKHDA DHALASHADA / /
CIIWAANKA:		MAGAALADA:	ZIP:	
TELEFOON LAMBARKA #:				
Madoonaysaa in lagugulasoo xariiro luuqad aan ahayn Af-Ingiriisiga?		<input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Haa	Hadii ay tahay haa, luuqadee?	
Sidee ayaaad rabtaa inaad kuhesho natiijooyinka baaritaanka caafimaadka ilkaha cunugaaga?		<input type="checkbox"/> Fadlan waxa aad siisaan ilmahayga inta uu dugsiga joogo si uu guriga ugu qaato. <input type="checkbox"/> Fadlan waxa aad boosta ugu soo dirtaan cinwaanka hoos ku qoran.		
Goorma ayaa cunugaada ugu danbeysay dhaqtarka ilkaha (dentist)?		<input type="checkbox"/> Wax ka yar 6 bilood kahor <input type="checkbox"/> Wax ka yar 2 sano kahor <input type="checkbox"/> Wax ka yar 1 sano kahor <input type="checkbox"/> Wax ka yar 2 sano kahor <input type="checkbox"/> Weligeedna		
Cunugaadu ma leeyahay dhaqtarka ilkaha oo joojta?		<input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Haa	Haddii ay haa tahay, Halkee?	
Ma donaysaa in laga caawiyo sidii aad dhaqtarka ilkaha cunugaada ugu heli lahayd?		<input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Haa		
Barnaamijkaan wax lacag ah lagama qaadayo, laakiin shirikadaada ceymiska caafimaadka ayaa laga yaaba in biil loo diro. Fadlan soo buuxi qeybta ceymiska ee waraaqdaan si loo hubiyo inaanu helno warbixinta ceymiskaada hada. Ceymisyada dadweynahu waxay badanaa bixiyaan dhamaanba qarashka baaritaankaan. Haddii qeyb qarashka ka mid ah aanu bixin ceymisku, waxaa lagu bixin doona deeqo. Wax qarash ah laguma qaadayo ardayda ama qoysaska ka qeyb gala barnaamijka. Baaritaanka lacagtiisa lagumasoo daraayo biilka mid kamid ah baaritaanada sanadlaha ah ee ilkaha cunugaaga.				
<b>FADLAN HOOS KUQOR MACLUUMAADKA CAYMISKAAGA APPLE HEALTH AMA MACLUUMAADKA CAYMISKA KALE EE ILKAHA:</b>				
MAGACA CAYMISKA CAAFIMAADKA ILKAHA:				
MAGACA KAQAYGALAHA:				
XIDHIIDHKA:	LAB AMA DHEDIG:	TAARIKHDA DHALASHADA	KAQAYBGALAHA: / /	
<b>MARKAAD SAXIIXDO FOOMKAAN WAXAAD OGLAATAY LABO BAARITAAN OO ILKAHA IYO SIINTA DAAWADA FLUORIDE.</b>				
SAXIIXA WAALIDKA AMA WAKIILKA			TAARIKHDA	



**Hay'ada Bulshada Ku Salaysan  
Foomka Ogolaanshada Waalidka/Wakiilka  
La Ansxiyay 2020-2021**

Public Health – Seattle & King  
County  
School-Based Partnerships Program  
401 5<sup>th</sup> Ave #1000  
Seattle, WA 98104  
206.263.8350

Neighborcare Health  
School-based Health Program  
1200 12th Ave S, STE 901  
Seattle, WA 98144-2712  
206.461.6935

**Ogolaanshaha Bixinta Duwaanada Waxbarashada Sida Uu Dhigayo Sharciga Xuquuqda iyo Sirta  
Waxbarashada Qoyska (Family Education Rights and Privacy Act, FERPA)**

Waxaan ogolahay u fasaxaada macluumaadka waxbarashada ee ilmahayga ee Dugsiga Degmada Seattle (Seattle School District) wakaaladaha kor ku xusan. Waan fahamsanahay in macluumaadka waxbarashada ay ku jiraan, oo aanay laakiin ku xadidnayn:

1. Magaca ardayga, Taariikhda Dhalashada iyo macluumaadka lagala soo xidhiidhayo
2. Deegaanka Ardayga: oo ay ku jiraan Heerka Waxbarasahda Gaarka ah iyo Heerka 504 iyo midabka/jinsiyada
3. Taariikhda Imaatinka
4. Taariikhda Anshaxa
5. Shaqada fasalka iyo taariikhda dhibcaha
6. Taariikhda Dhibcaha Imtixaanka
7. Taariikhda Ku Biirista
8. Dhincaha Layliska
9. Laylisyada Soo Socda & Kuwa Maqan

Siideyntaan waxaa ku jira in fasax loo siiyo shaqaalaha hayada inay heli karaan macluumaadka waxbarashada cunuga iyagoo isticmaalaya habka atomatikada ee macluumaadka looga helo Dugsiga Degmada Seattle (Seattle Public Schools).

Anigu waan fahmay ujeedada loo wadaagayo rekoorkani inay tahay in hayadaha kor lagu soo sheegay ay helaan warbixinta cunugayga ee xarunta caafimaadka ee iskuulka ku taal iyo/ama dhaqtarka caafimaadka maskaxda loona sheego warbixintiisa barnaamijka waxbarashada iyo horumarkiisa. Iyada oo laga wadashaqaynayo Caafimaadka Bulshada - Seattle & King County (Public Health - Seattle & King County), shaqaalaha Neighborcare Health waxa ay la shaqayn doonaan ilmahayga iyo/ama dugsigiisa/ keeda si loogu dadaalo si loo hagaajiyo guusha ilmahayga ee dugsiga. Waxaan ogahay in aan diidi karo ogolaanshahan aniga oo u diraya ogaysiis qoraal ah Seattle School District's School & Community Partnership Department, MS: 33-160 P.O. Box 34165 Seattle, WA 98124.

Siidaynta macluumaadkaan waxay ka dhigi doontaa macluumaadka waxbarashada ee kor ku taxan, kuwaas oo ay ku jiraan xogta taariikhiga ah ee ardayga, kuwo ay heli karaan shaqaalaha wakaaladu laga bilaabo taariikhda ogolaanshaha saxeexa ilaa Diseember 31, 2021. Anigu waxaan u ogolaaday inuu Dugsiga Degmada Seattle siin karo macluumaadka wakaaladaha kor ku taxan (fadlan si cad u daabac):

**Saxeexa waalidka/wakiilka (haddii ilmuhu uu yahay 17 ama ka yarhay):** \_\_\_\_\_

**Magaca Daabacan ee Waalidka/Koriyaha:** \_\_\_\_\_

*Saxeexa Ardayga (hadii ilmuhu yahay 18 ama ka wayn yahay):* \_\_\_\_\_

Taariikhda Maanta: \_\_\_\_\_

DAABACAN **Magaca Ardayga** (Magaca kowaad iyo sadexaad)

Ardayga **Taariikhda Dhalashada**

**\*\*Ardayga Lambarka Aqoonsiga Degmada Dugsiga**

Dugsiga Ardayga

**\*\*\* Lambarka Aqoonsiga Ardayga waxaa laga heli karaa Kaarka Hay'ada Ururka Ardayga (Associated Student Body, ASB) ee ardayga, kaarka warbixinta, waraaqaha ay iskuulku soo diraan, ama in lala soo xariiro iskuulka ardayga**





## OGAYSIISKA DHAQANADA GAAR AHAANSHAHA

OGAYSIISKAN WAXA UU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOO SHAACIN KARO. WUXUU KALOO SHARAXAA SIDA AAD ADIGA U HELI KARTID MACLUUMAADKAAN. **FADLAN SI TAXADIR LEH U FIIRI.**

Neighborcare Health waxay ballan ku hbaadaysaa inay ku siiso daryeelka ugu tayada sareeya gudaha deegaan ilaaliya gaar ahaanshahaaga iyo xil qariska macluumaadkaaga caafimaadka. Gaadhida hadafkan, ogaysiiskan waxa uu sharaxayaa dhaqanadayada gaar ahaanshaha, siiba xuquuqaahaaga, ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka.

### **Cidda raaci doonta dhaqanada gaar ahaanshaha gudaha Ogaysiiskan**

Dhaqanadan gaar ahaanshaha lagu faahfaahiyay Ogaysiiskan waxaa raaci doona dhammaan xirfad yaqaanada daryeelka caafimaadka, shaqaalaha, tababarayaasha, ardayda iyo mutadawiciinta Neighborcare Health.

### **Isticmaalada iyo Shaacinaha macluumaadka Caafimaadkaaga Oggolaansho la'aan**

Waxaanu isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka la'aanta oggolaanshahaaga dadka soo socda, ama ujeedooyin kale la oggolaaday ama sharcigu u baahanyahay, ay ka mid tahay:

#### **Daawaynta**

Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka sida lama huraanka ah si aanu kuu siino daawayn ama adeegyo. Tusaale ahaan, waxaanu u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aanu kuu siino daryeelka caafimaadka adiga, oo waxaanu la tashan karnaa adeeg bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadka wixii ku saabsan daawayntaada.

#### **Lacag bixinta**

Waxaanu isticmaali karnaa oo shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka markaad daawaynta aadka hesho Neighborcare Health biil ayaa la soo diri karaa oo lacag bixinta lagaa qaadaa adiga, shirkada caymiska, ama koox saddexaad oo kale. Tusaale ahaan, waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si loo codsado lacag bixin oo looga helo lacag bixin caymiyahaaga caafimaadka, oo loo xaqiijiyay caymiyahaaga caafimaadka inuu bixin doono daawayntaada.

#### **Hawlgalada Daryeelka Caafimaad**

Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si loo fuliyo qaybo maamul, dhaqaale, sharci iyo hawlaha horumarinta tayada lama huraanka u ah in la wado ganacsigayaga iyo in la taageero hawlahayaga daawaynta iyo lacag bixinta. Tusaale ahaan, waxaanu isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aanu u qiimayno tayada adeegyadayada ee adiga lagu siiyo iyo si loo qiimeeyo wax qabadka shaqaalahayaga adiga ku siinaya daryeelka.

### **Is dhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIE)**

Waxaanu ka qayb qaadan karnaa is dhaafsiga macluumaadka caafimaadka gaarka ah halka aanu u shaacin karno macluumaadkaaga caafimaadka, sida uu sharcigu oggolyahay, adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee kale ama hay'adaha daawaynta, lacag bixinta, ama ujeedooyinka hawlgalada daryeelka. Is dhaafsiga macluumaadka caafimaadka waxa uu bixin karaa helida degdeg ah, isku dubarid ka wanaagsan oo daryeelka ah oo waxa uu ka caawiyaa adeeg bixiyayaasha iyo saraakiisha caafimaadka dad waynaha inay gaadhaan go'aan aad looga warqabo.

### **Qaban qaabada Daryeelka Caafimaadka Abaabulan**

Waxaanu ka qayb geli karnaa habbayn wada jir ah oo lala sameeyo adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka kale ama hay'adaha daryeelka caafimaadka halka aan isticmaali karno ama shaacin karno macluumaadkaaga, sida sharcigu oggolaaday, si looga qayb galo hawlaha wada jirka ah ee ku lugta leh daawaynta, dib u eegida go'aamada daryeelka caafimaadka, qiimaynta tayada ama hawlaha horumarinta, ama hawlaha lacag bixinta.

Neighborcare Health waxa uu kamid yahay daryeelka caafimaadka ee habaysan ee lasoo diyaariyay oo ay ku jiraan Dalada Macluumaadka Caafimaadka Bulshada Oregon (Oregon Community Health Information Network, OCHIN). Liiska saxda ah ee OCHIN ka qayb galayaashooda waxaa laga heli karaa [www.ochin.org](http://www.ochin.org). Cida gacan saar lala leeyahay ahaan Neighborcare Health, OCHIN waxay siisaa macluumaadka teknooloojiyada iyo adeegyada la xidhiidha Neighborcare Health iyo ka qayb galayaasha kale ee OCHIN. OCHIN waxay sidoo kale ka shaqaysaa qiimaynta iyo hormarka tayada hawlaha iyada oo matalaysa dhamaan cida ka qayb galaysa. Tusaale ahaan, isku duwaha OCHIN ee hawlaha qiimaynta caafimaadka ayaa matala hay'ada ka qayb galaya si loo sameeyo nidaamka ugu wanaagsan heerka ah iyo qiimaynta faa'idooyinka caafimaadka ee laga soo qaadanayo isticmaalka nidaamka duwaanka caafimaadka ee elektoronooniga ah. OCHIN waxay ka caawinaysaa ka qayb galayaasha wada shaqaynta sidii kor loogu qaadi lahaa maamulida tixraaca bukaanka banaanka iyo gudaha. Macluumaadkaaga caafimaadka waxay la wadaagi kartaa Neighborcare Health ka qayb galayaasha kale ee OCHIN ama iswaydaarsiga kaliya ee macluumaadka caafimaadkamarka ay daawaynta caafimaad daruuri u tahay ama shaqada daryeelka caafimaadka ee ujeedadeedu tahay in la sameeyo daryeelka caafimaad oo habaysan.

Shaqada daryeelka caafimaadka waxaa kamid ah, iyo waxyebo kale, u samaynta khariirada

deegaanka goobta si loo hormariyo gunooyinka caafimaadka ee aad heleyso. Macluumaadka caafimaadka shakhsi ahaaneed waxaa kamid noqon kara macluumaadka caafimaadka ee wakhtigii lasoo dhaafay, lagu jiro ama soo socda iyo sidoo kale macluumaadka dhigaya Shuruucda Sirta. Macluumaadkan, ilaa inta la sheegey, waxaa loo bixin doonaa si joogto ah iyada oo la adeegsanayo Shuruucda Sirta ama wixii kale ee sharciga qabanaya ah sida dib u eegista lagu sameeyay. Waxa aad xaq u leedahay inaad is badasho oo aad ka noqoto oggolaanshaha wakhti kasta, laakiin, macluumaadka hore in loo bixiyay ayaa laga yaabaa iyada oo laga duulayo oggolaanshahaaga. Oggolaanshahani waxa uu shaqayn doonaa ilaa inta qoraal lagaga noqonayo. Haddii aad dalbato, waxaa lagu siin doonaa liiska hay'ada ee macluumaadka la siiyay.

### **Hawlaha Lacag ururinta**

Waxaanu u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ujeedooyinka lacag ururinta ururkayaga, ay ku jiraan u shaacinta macluumaadka ururka na metelaya si lacag loo urursho. Wada xidhiidh kasta oo adiga ah oo ku saabsan lacag ururinta waxa uu ku siin doonaa fursad cad si aan loo dooran hawlaha lacag ururinta ah oo dheeraad ah.

### **Isticmaalada dheeraadka ah iyo shaacinaha macluumaadka caafimaadkaaga oggolaansho la'aan**

- Sida sharciga gobolka iyo federaalku u baahanyahay.
- Si laguula soo xidhiidho xusuusiyaha ballanka, lagu siiyo natiijooyinka baadhida, laguugu wargeliyo adiga waxa ku saabsan ikhtiyaarada ama talada adiga ku saabsan caafimaadka kale ee la xidhiidha dheefaha iyo adeegyada.
- Kooxaha saddexaad ee lagu tixraacay sida "shuraakada ganacsiga" ee ku bixiya adeega iyagoo na metelaya, sida biil bixinta, dayactirka sooftiweeke iyo adeegyada sharciga.
- Si loogu shaaciyo macluumaadka daryeelka caafimaadka ee adiga kugu saabsan cilmi baadhayaasha caafimaadka diyaarinaya si ay u qabtaan mashruucyo caafimaad.
- Si looga hortaggo ama loo yareeyo khatarta mustaqbalka ku dhici karta caafimaadkaaga iyo badbaadada ama qof kale.
- Ku socota ciidanka haddii aad xubin ka tahay xooggaga ciidanka oo waa naloo oggolyahay ama waxaa sidaa nooga baahan sharciga.
- Saraakiisha federaalka loo xil saaray wixii ah sir doonka, ku lid ah sir doonka ama hawlaha kale ee amniga qaranka.

- Saraakiisha federaalka loo xil saaray markaas waxay samayn karaan baadhitaano gaar ah ama bixin karaan ilaalinta Madax waynaha Maraykanka ama qof kale oo loo xilsaaray.
- Saraakiisha sharci fulinta sida loo xil saaray ama sharcigu u baahan yahay.
- Magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada la midka ah ee bixinaya dheefaha dhaawaca shaqada la xidhiidha ama jirrada.
- Dhacdada masiibo dhacdo, ururada ka caawinaya dedaalada samatabixinta masiibada markaas qoyskaagu waxaa lagu wargelin karaa xaaladaada iyo goobta.
- Sarkaalka baadha dhimashada, baadhayaasha caafimaadka iyo habbeeyayaasha aaska, sida la oggolaaday ama sharcigu u baahanyahay ee lama huraanka u ah iyagu inay u gutaan waajibkooda.
- Haddii aad tahay qof xubin ku deeqa, ururada wax ka qabta helida xubintan ama xubin jidh ku beerida ama kaydka xubinta, sida lama huraanka u ah inay ka caawiyaan helida xubinta, ku beerida xubinta ama ku deeqida.
- Ee wakaaladaha dowladda, ruqsad bixinta, hanti dhowrka iyo qiimaynta.
- Hay'adaha xabsiga sida la oggolaaday ama uu sharcigu u baahanyahay haddii adigu aad tahay maxbuus ama aad ku jirto haynta xabsi ee saraakiisha sharci fulinta.
- Masuulada caafimaadka dad waynaha ee hawlaha caafimaadka dad waynaha. Hawlaha caafimaadka dad waynaha waxaa ka mid ah ka hortagga ama xakamaynta cudurada, dhaawaca, naafanimada, iyo ka jawaabida warbixinaha xad gudubka, dayaca ama ku xad gudubka xubin qoyska ah. Waxaanu shaacin karaan macluumaadka caafimaadka ee qofka ama wakaalada looga baahan yahay inay ka warbixiso dhacdooyinka aan wanaagsanayn, ceebta alaabtu leedahay ama dhibaatooyinka, leexsanaanta bayolojiyeed ee alaabta, ama xusuusinta laabta, dib u samaynta ama beddelida.
- Maxkamadaha iyo qareenada marka aynu helno amar maxkamadeed, yeedhmo maxkamadeed ama tilmaamo kale oo sharci oo ka soo baxay maxkamadahan ama guddiyada dad waynaha ama in aynu nafaheena ka difaacno dacwad la inagu soo oogay

## Isticmaalada iyo Shaacinaha macluumaadka Caafimaadkaaga Oggolaanshaha leh

### Isticmaalka iyo Shaacinaha u Baahan Oggolaanshahaaga Qoran:

- Qoraalada daawaynta maskaxda: Ma shaacin doono qoraalada daawaynta maskaxda iyaddoon lahayd oggolaanshahaaga qoran iyaddoo isticmaalka iyo shaacinta haddii kale uu sharcigu oggolaado ama sharcigu u baahan yahay mooyaane.
- Suuq gaynta: Kama qayb qaadan doono shaacinaha ka dhigan iibka macluumaadkaaga caafimaadka iyaddoo lahayn oggolaanshahaaga qoran mooyaane. Iibka macluumaadka caafimaadka ee ilaashan (protected health information, PHI) waxa uu dhacaa marka anaga ama qof

aanu qandaraas siinaa si toos ah ama aan toos ahayn, u helo lacag bixinta is dhaafsiga macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaashan.

- Dadka da'da yar: Waxaanu raaci doonaa sharciga Gobolka Washington marka aanu isticmaalayno ama wadaagayno PHI dadka da'da yar. Ilmaha qaata adeegyada daryeelka caafimaadka ee la xariira HIV/AIDS; STD, daweynta caafimaadka madaxa, baarista qamrada/mukhadaraadka, iyo daweynta ama caafimaadka dhalmda waxay codsan karaan in qof kale oo iyaga matalo in uu qaado macluumaadkaas. Haddii cunugga uusaan qofna siinin ruqsad qoran, waxaan macluumaadka siin doonaa oo keliya cunugga.

### Isticmaalada Kale iyo Shaacinaha

Codsiyada lagu raadinaayo macluumaadka marka laga reebo kuwa ku sifeysan Ogeysiiskan waxay u baahan doonaan ruqsadaada qoran. Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay in aad qortid foomka ruqsadda ka hor inta aadan PHI u dirin shirkadda ceymiska nafta ama qareenkaada. Waad la noqon kartaa ruqsadaada waqti kasta marka aad na siisid codsi qoran.

### Xuquuqaahaaga Gaarka ah

#### Xaqa in La baadho oo La koobiyaysto Diiwaanada

Waxaad codsan kartaa inaad aragto diiwaanadaada caafimaadka iyo diiwaanada lacag bixinta si loo baadho iyo/ama loo codsado koobiyada diiwaanada. Dhamaan codsiyada lagu fiiriyo diiwaanaka waa in la soo qoro. Sida hoos timaado xaaladaha qaar, waxaa dhici karto in aan diidno in la helo diiwaanakaada. Waxaa dhici karto in aan kugu soo dallacno khidmadda samaynta koobiyada iyo dirista diiwaanaka.

#### Xaqa in La codsado Wax ka beddel

Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato inaan wax ka beddelno PHI gaaga. Codsigaada waa in uu qoran yahay, iyo waa in uu sharaxo sababta loo baahan yahay in la baddalo macluumaadka. Waxaa dhici karto in aan diidno codsigaada sida hoos timaado xaaladaha qaar.

#### Xaqa Shaacinaha Xisaabaadka

Waad waydiin kartaa, qoraal ahaan, xisaab kasta noocyo gaar ah oo shaacinaha macluumaadkaaga caafimaadka ah. Sharcigu waxa uu ka reebaa xisaabta qaar badan oo noocyada shaacinaha ah, sida kuwan loo sameeyay inay ku daryeelaan adiga, ay bixiyaan adeegyadaada caafimaadka, ama halka aad ku bixisay oggolaanshahaaga qoran ee shaacinta.

Si loo sameeyo codsiga xisaabta eeg macluumaadka xidhiidhka hoose. Guud ahaan, waxaanu ka jawaabi doonaa codsigaaga gudaha 60 daqiiqadood helida codsigaaga iyaddoon u baahano wakhti dheeraad ah mooyaane.

#### Xaqa Lagu codsado Xayiraadaha

Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato inaanu saarno xayiraado dheeraad ah isticmaalkayaga iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad, ay ku jiraan isticmaalada iyo shaacinaha lacag bixinta, daawaynta, iyo hawlagaalada daryeelka caafimaadka, iyo xubnaha qoyska, saaxiibada, ama kuwa kale ee ku lugta leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga. Si loo codsado xayiraad, waa inaad u sheegtaa daryeelahaaga ama la xidhiidhaa Xafiiska Xil qarinta addoo isticmaala macluumaadka ku qoran dhammaadka Ogaysiiskan. Waxaa lagu waydiin

karaa inaad u soo gudbisoo codsigaaga qoraal ahaan. Naloogama baahna inaanu aqbalno codsigaaga. Haddii aanu aqbalno, waxaanu kugu wargelin doonaa qoraal ahaan oo waxaanu sharfi doonaa heshiiskeena iyaddoo macluumaadka loo baahdo mooyaane si lagu siiyo daawaynta degdega ah ama waxaa nalooga baahan yahay ama waxaa oggolaada sharciga in la shaaciyo.

Haddii adiga ama xubin kale oo qoyska ah iyagoo ku metelaya ay lacag u siiyiin si buuxda adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka adeeg daryeel oo caafimaad oo gaar ah ama shay oo si gaar ah u codsadaan inaanu shaacin macluumaadkan ku saabsan shay daryeelka caafimaadka ama adeega qorshahaaga caafimaad ee lacag bixinta ama ujeedooyinka hawlagaalada daryeelka caafimaadka, waanu aqbali doonaa codsigan. Guud ahaan ma xayiri karno shaacinta macluumaadka loogu baahan yahay ujeedooyinka daawaynta daryeelka caafimaadka.

### Xaqa lagu Codsado wada xidhiidhka qarsoodiga ah

Waxaad codsan kartaa in aanu kugula xidhiidhno ama aanu kuu soo dirno PHI adiga qaab gaar ah ama goob gaar ah, sida keliya xaga shaqada ama guriga, ama boostadda. Si loo codsado macluumaad qarsoodi ah, fadlan warqad u qor Sarkaalkayaga Xil qarinta cinwaanka hoose oo sheeg sida ama meesha aad jeceshahay in lagugula soo xidhiidho. Kuma waydiin doono sababta codsigaaga, oo waxaanu habbayan doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah.

### Xaqa Nuqulka Warqadda Ogaysiiskan

Waxaad leedahay nuqulka warqadda ogaysiiskan wakhti kasta. Nuqulada Ogaysiiskan waxaa laga heli karaa dhammaan goobahayaga, websaydkayaga [neighborcare.org](http://neighborcare.org), ama iyaddoo lala soo xidhiidhaya Sarkaalka Xil qarinta [privacy@neighborcare.org](mailto:privacy@neighborcare.org).

### Xaqa Ogaysiiska Jebinta

Waxaad leedahay xaqa aad ku hesho wargelinaha jebinta macluumaadkaaga caafimaadka sida sharcigu u baahanyahay.

### Isbeddela Ogaysiiskan

Waxaa noo dhowran xaqa aanu ku beddelno dhaqanadaya oo Ogaysiiskan iyo in laga dhigo Ogaysiiska cusub mid dhaqan gal u ah dhammaan PHI aanu wadno. Haddii aanu sidaan samayno, ogaysiiska la cusboonaysiiyay waxaa la soo gelin doonaa websaydkayaga oo waxaa laga heli doonaa goobahayaga. Marka la codsado, waxaanu ku siin doonaa Ogaysiis kasta oo dib loo eegay adiga.

### Su'aalaha iyo Cabashooyinka

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xuquuqaahaaga gaar ahaanshaha, ama aad ka walaacsantahay inaanu ku xad gudubnay xuquuqdaada gaar ahaanshaheeda, waxaad la xidhiidhi kartaa Sarkaalka Xil qarinta Neighborcare Health iimaylkan [privacy@neighborcare.org](mailto:privacy@neighborcare.org). Waxaad sidoo kale leedahay xaqa aad ugu cabato Xoghayaha Adeegyada Caafimaadka iyo Aadahama. Lagaagama aargoosan doono adiga xarayntaada cabashada.

### Neighborcare Health

1200 12th Ave S, Suite 901  
Seattle, WA 98144  
206-461-6935  
[neighborcare.org](http://neighborcare.org)